## Baaskiilada Naafada iyo Baaskiilka gacanta lagu wado. Noqo mid jidhkiisa dhisan yahay oo wakhti farxad leh qaado

Wadista baaskiilada naafada iyo baaskiilka gacanta lagu wado waa jimicsi weyn iyo hab cajiib ah oo waqti lagula qaato qoyska iyo asxaabta. Iyada oo taas maskaxda lagu hayo, shaqaalaha takhasuska u leh dabiibka madadaalada ee Gillette (CTRS) waxay bixiyaan kulamada ilaha kheyraadka dabiibka madadaalada si ay uga caawiyaan qoysaska inay doortaan qalabka madadaalada ee naafada.

Kulamada halka saac ah waxaa ka mid ah:

- Qiimeynta awoodda iyo himilooyinka ayaa la dhammaystiraa si loo go'aamiyo nooca baaskiilka wax u tari kara.
- Dib-u-eegis ku saabsan qalabka ku habboon awoodda iyo baahida qofka.
- Fursad aad ku aragto iyo, marka ay ku habboon tahay aad ku tijaabiso mid ka mid ah baaskiilada naafada iyo baaskiilka gacanta lagu wado ee Gillette yaala.
- Wada hadal ku saabsan waxyaabaha la qabsiga u sahli kara (kuwo iyagoo sameysan iib lagu heli karo iyo kuwo gaar loogu sameeyo).
- Macluumaadka ku saabsan iibsashada iyo isticmaalka baaskiilka naafada, oo ay ku jiraan xulashooyinka kaalmada kharash bixinta iyo ilaha kheyraadka.

Dhamaadka kulanka, waxaad heli doontaa waraaqaha ilaha kheyraadka oo kaa caawinaya inaad doorato oo aad iibsato qalabka. Waxaan sidoo kale bixinaa adeegyada soo socda ee la xiriira:

- Wadatashi raad-raac ah oo telefoonka aad kula yeelato qof CTRS ah.
- Waraaqo qeexaya xulashooyinka kaalmada kharash bixinta (iibsashada qalabka isboortiga iyo madadaalada ee naafada, oo ay ku jiraan baaskiilada, sida caadiga ah ma bixiyaan caymiska / kaararka caafimaadka).
- Macluumaadka ku saabsan in qalabka gaar loogu sameeyo qofka iyo wax yaabaha u sahli kara la qabsiga.

## Tixgelino kale

Markaad la shaqeyneyso soo-saarayaasha ama iibiyaha, xusuusnow:

- Weydii haddii qalabka la tijaabiyay si loo hubiyo bedqabka. Haddii ay sidaas tahay, maxay ahaayeen natiijooyinka? Waa maxay khibradda ganacsadaha ama soo saaraha ee cimri dhererka iyo badbaadada qalabka waqti ka dib?
- Weydii khibradda iibiyaha ee la shaqeynta qalabka iyo carruurta iyo dadka waaweyn ee naafada ah.
- Codso bayaan cad oo ku saabsan qiimaha qalabka iyo xulashooyinka lacag bixinta.
- Soo ogow haddii iibiyaha uu xareyeeyo waraaqaha caymiska.
- Codso bayaan cad oo ku saabsan qorshaha taageerada ama habraaca iibiyaha. (iibiyaha ma bixiyaa barashada, dayactirka, rakibidda, iyo la ekeysiinta qalabka? Waa maxay taageerada aan heli karo haddii ay jiraan dhibaatooyin ku saabsan qalabka?)
- Ogow haddii ay jirto dammaanad qaad. Haddii ay sidaas tahay, waa maxay shuruudaha?
- Weydii wax ku saabsan shay-shay ku beddelashada, qiimo dhimista ama xulashooyinka kale ee iibsashada baaskiil weyn marka ilmuhu koro.
- Ka qaado warqadda qiimaha oo dhammeystiran ku qoranyahay ee qalabka iyo dhammaan wixii fududeynaya la qabsiga ee gaar ahaan loogu daray ka hor intaadan iibsanin qalabka.

Had iyo jeer xiro koofiyad adag markaad waddo, oo hubi inaad qaadato wakhti farxad leh!

Macluumaadkan waxaa loogu talagalay ujeeddooyin waxbarasho oo keliya. Looguma talagalin in lagu beddelo talooyinka bixiyeyaasha daryeelka caafimaadka. Haddii aad wax su'aalo ah qabtid, la hadal dhakhtarkaaga ama kuwa kale ee kooxdaada daryeelka caafimaadka.

Haddii aad tahay bukaan Gillette ah oo qabo su'aalo deg deg ah ama walaac, fadlan la xiriir Lambarka Kalkaalisooyinka 651-229-3890.